

Benjamin E. Mays IB World School

2016-2017 Family Friendly SCIP

Haddaan nahay iskuulka Benjamin E. Mays IB World School, waxaan ardayda ku taxadi galinaa inay fikirhooda ku cabbiraan hab caalami ah oo dunida oo dhan ku saleysan. Maadaama oon nahay iskuul ah International Baccalaureate (IB), Benjamin E. Mays wuxuu sidoo kale ardayda ku dhiirri galiyaa inay fahmaan dunida ku hareeraysan iyo waliba qaabkii ay ugu dhaqmi lahayeen. Barnaamijka IB wuxuu ardayda siinayaa fursad ay ku ballaariyaan fahamkooda caalamiga ah iyadoo la siinayo mashaariic qiimeyn ku sameysa xal u raadinta xaaladaha dunida.

Mid ka mid ah qaababka aan ku wanaajino kuna horumarino skuulkeena waa qorshaha degmada ee SCIP (School Comprehensive Improvement Plan = Qorsha Wanaajinta Iskuulka). Qorshahannaga SCIP waxaan dib ugu eegnaa xogta iskuulkeena kadibna waxaan sameynaa qorshe aan horumar ugu sameyno iskuulka sanadka soo socda.

Qorshanaha SCIP ee sanadkan waxaan diiradda ku saaraynaa saddex qeybood, sii wadida dhaqamada habboon iyo waliba annagoo saldhig uga dhigayna hawlaha aan qabano waxbarashada shakhsiga ee gaarka ah:

A K H R I S K A	<p>Waxaan diiradda saaraynaa wanaajinta akhriska ardayda annagoo...</p> <ul style="list-style-type: none"> Ka hirgalin doonna dhismaha iskuulka oo dhan siminaaro ku saabsan akhrisaka. Isticmaalayna xogta arday walba aan ka hayno si aan ugu diyaarino waxbarasho si gaar ah ugu habboon arday kasta. Kulmin doonna ardayda si ay isaga caawiyaan akhriska iyo waliba fahamka buugaagta kala heerka ah. Sameyn doonna qaab iyo hab caawiya arday kasta si uu arday walba u noqdo mid si gooni ah isagu/iyadu wax u akhrisan kara.
X I S A A B T A	<p>Waxaan diiradda saaraynaa awood-siinta ardayda ee maadada Xisaabta annagoo...</p> <ul style="list-style-type: none"> Isticmaalayna istiraatiijiyad ku salaysan cilmi-baaris oo ku saabsan maadada xisaabta sidoo kale waxaan adeegsan doonnaa 'manipulatives' si aan u ballarino fahamka ardayda ee xisaabta. Siin doonna macallimiinta macluumaad sharraxaya habka baridda xisaabta ee Minnesota habkan oo wata tusaalooyin ka mid ah xirfadaha xisaabeed ee ay ardaydu u baahanyihiin inay si wanaagsan u bartaan. Bari doonna assaaska xisaabta (ku-dar, ka-jar, ku-dhufo iyo u'qeybi) annagoo sidoo kale isticmaali doona habab kala geddisan.
P B I S	<p>Waxaan diiradda saaraynaa wanaajinta hab-dhaqanka wanaagsan ee iskuulka oo dhan annagoo...</p> <ul style="list-style-type: none"> Shaqaalaha u tababari doonna isticmaalka iyo adeegsiga istiraatiijiyadda loo yaqaano (<i>break and buddy room</i>). Maamuleyaasha iyo khubarada dabeecadaha ayaa siin doona macallimiinta macluumaad ku saabsan adeegsiga istiraatiijiyadda (<i>break and buddy room</i>).

Wixii macluumaad dheeraad ah, waxaad booqataa bartan <http://www.spps.org/BenMays> oo aad ka heli doonto qorshaha SCIP ee 2016-17 oo dhameystiran. Waxaan kaaga mahad-celinaynaa wada shaqeyntaada iyo sida ay kaaga go'antahay in ilmahaagu guuleysto. Waxaan rajeynaynaa sanad kale oo wadashaqeyn iyo is-taakuleysi leh!